

Waa maxay Cagaarshowga B?

Cagaarshoowga B waa fayras ku dhaca beerka. Haddii aan la daawayn, wuxuu keeni karaa hawl gabka beerka iyo kansar.

Qiyaastii 296 milyan oo qof aaya la nool cagaarshoowga B aduunka oo dhan. Dad badan ayaan ogayn inay qabaan sababtoo ah ma dareemayaan xanuun ama uma muuqdaan kuwo jiran.

Fayraska cagaarshoowga B ayaa iskaga gudba dadka marka uu jirkooda galoo dhiiga ama dheecaanka jidhka qofka fayraska sida.

Cagaarshoowga B iyo uurka

Haddii aad uur leedahay, waa in dhiigaaga laga baaraa cagaarshoowga B kaasoo qayb ka ah daryeelkaaga hooyada iyo ilmaha.

Waxaad cagaarshoowga B qaadsiin kartaa ilmahaaga dhashay marka uu dhalanaayo haddii aad qabto caabuqa.

Haddii aad uur leedahay aadna qabto cagaarshoowga B, cunugaaga ayaa qaadan kara taxaneyaal talaal ah oo ka bilaabanaaya markuu dhasho si looga difaaco fayraska.



Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah:

**Centers for Disease Control and Prevention (CDC,
Xarumaha Ka hortaga iyo Xakameyn Xanuunka)**
www.cdc.gov/hepatitis/hbv/

Hooyooyinka Cagaarshow B
www.hepbmoms.org (Ingiriis)



DOH 420-406 May 2022 Somali

Si aad u codsato dukumiintigaan oo qaab kale ah, wac 1-800-525-0127. Macaamiisha dhagoolka ah ama kuwa maqalkoodu culus yahay, fadlan waca 711 (Washington Relay) ama iimayl u dir civil.rights@doh.wa.gov. Isha xogta: CDC, Protect Your Baby for Life



Cagaarshoowga B

Waxa ay tahay inaad ogaato si aad u difaacdo naftaada iyo ilmahaaga





Cagaarshoowga B khatar wayn miyuu ku yahay cunugayga?

Marka uu cagaarshoowga B ku dhaco ilmaha yaryar, waxaa macquul ah inay 90% qaadaan caabuqa muddada dheer, oo noloshooda dhan la socda.

Markaan laga daawayn, ku dhawaad 1 kamid ah 4tii ilmood ee qaba Cagaarshoowga B oo dabo dheeraada ayaa qaadi doona xanuunnada xun ee beerka sida dhaawaca beerka, cudurka beerka, ama kansarka beerka.

Nasiib wanaag, cagaarshoowga B waxaa looga hortagi karaa talaal aad u badqab iyo waxtar badan.

Difaac ilmahaaga oo kahortag Cagaarshoowga B

Cunugaaga waa in la siiyo kuurada koowaad ee talaalka cagaarshoowga B 24 saac gudahood markuu dhasho kadib.

Haddii aad qabto cagaarshoowga B, cunugaaga waa in lagu duraa hepatitis B immune globulin (HBIG) 12 saac gudahood markuu dhasho kadib.

Cunugaagu wuxuu u baahan yahay dhammaan 3 talaal ee Cagaarshoowga B iyo cirbada HBIG si looga difaaco cagaarshoowga B. Baar cunugaaga 9-12 bilood kadib si aad u xaqijiso in cunugaagu qabo difaaca cudurka.

Taariikhda loo cayimay	Ilmaha ay dhashay hooyo qabta Cagaarshoowga B waa in la siiyo talaalka
Markuu dhasho	Kuurada marka ilmuhi dhasho ee talaalka Cagaarshoowga B iyo daawada immune globulin (HBIG) ee Cagaarshoowga B
1–2 billood	Kuurada 2aad ee talaalka Cagaarshoowga B
6 billood	Kuurada 3aad ee talaalka Cagaarshoowga B
9–12 billood	Baar si aad u xaqijiso in cunugaagu haysto difaac

Halkaan waxaad ka helaysaa qaababka kale ood ku difaacyoso ilmahaaga:

- Wali waad naasnuujin kartaa ilmahaaga haddii aad qabto cagaarshoowga B. La hadal dhakhtarkaaga haddii aad isku aragto dilaaca ama dhiig ka imaanaaya ibta naasaha, waxaa jira dookhyo ku caawinaaya intaad ilmaha naas nuujinayo.
- Hayso diiwaanka talaalkaaga Cagaarshoowga B una soo qaado booqashooyinkaaga caafimaadka.
- Hala baaro xubnaha qoyskaaga hana qaataan talaalkaga Cagaarshoowga B.

Haddii aadan qabin cagaarshoowga B

Waxaad wali naftaada iyo ilmahaagaba ku difaaci kartaa talaal badqab iyo waxtar leh. Xaqiji inaad dhamaysato taxaneyasha!

Taariikhda loo cayimay	Ilmaha dhashay waa inuu qaataa
Markuu dhasho	Kuurada marka ilmuhi dhasho ee talaalka Cagaarshoowga B
1–2 billood	Kuurada 2aad ee talaalka Cagaarshoowga B
6 billood	Kuurada 3aad ee talaalka Cagaarshoowga B

Daryeel naftaada haddii aad qabto Cagaarshoowga B

Waxaad u baahan kartaa baaritaanno dheeraad ah si aad u hubiso caafimaadka beerkaaga aadna u eegto haddii aad u baahan tahay daawada.

Daawooyinka, loo yaqanaa daawada kahortaga fayraska, ayaa daawayn kara dad badan oo qaba Cagaarshoowga B. Hase yeeshee, qof kasta maaha inuu daawo u baahan yahay.

Waydi dhakhtar kahor intaadan cunin wax daawo ah, daawooyinka dukaannada laga iibsado, kaalmaati, ama feetamiino waayo daawooyinka qaar ayaa waxyeelo u gaysan kara beerkaaga.

Waxaa sidoo kale macquul ah inaad ka faa'iidsato talaalka Cagaarshoowga A. Siiwad inaad u tagto dhakhtar kadib marka aad dhasho si loola socdo caabuqaaga.